

## Daryeelida guriga dhar dhaqista

Kiraystayaal fara badan ayaa wadaagaya guriga dhar dhaqista, sidaas daraadeed ayay muhiim utahay in la nadiifiyo oo la raaco xeerarka. Waad ku mahadsan tahay in adigu aad muujinayso qadarin!

### Nadiifin

#### GURIGA DHAR DHAQSITA

Xaaq oo ka qalaji qoyaanka dhulka.  
Tir tir dhamaan meelaha wax la saarto.  
Demi oo xir dhamaan daaqadaha.

#### MAKIINADA DHAQ DHAQISTA

Ku tir tir maro yar gudaha iyo dusha makiinada  
dhar dhaqista.  
Nadiifi sanduuqa maadada dhar dhaqista  
(haraaga maadada jilacsan waxay saamay  
karaan midka qaba xasaasiyada)  
Sanduuqa oo furan ka tag, si uu usiidaayo  
qoyaanka.

#### QALAJIHA

Ku tir tir maro yar dusha qalajiyaha.  
Nadiifi kala soocaha oo ka bixi dufta iy wasaqda.  
Duleelka oo furan ka tag si uu usiidaayo  
qoyaanka.

#### ARMAAJADA QALAJINTA

Nadiifi kala soocaha iyo dhulka.  
Albaabada fur si uu usiidaayo qoyaanka.

#### ILAALI MAKIINADAH

Uisticmaal bacda dhaqista BH-bir xirista leh.  
Biro xirista keligooda waxay halaynayaan  
makiinadda.  
Waxyaalaha yar yar kasoo saar jeebabka.  
Ha ku midabayn ama ha ku cadayn dharka  
makiinada dhar dhaqista.  
Saliyadda laguma dhaqan karo makiinadaha.

### Waqtiyada dhaqista

Waqtigaada keliya dhaqo, kiraysta kugu xigaa  
uma baahna inuu sugo.  
Waqtigaada hadii aadan isticmaalaynin, iska  
baaji sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka.  
Lama ogola inaad ku dhaqato qof kale waqtigis,  
iyadoo loo eegin hadii uu dhaqanyo iyo in kale.

### Soo wargelin qalad

Ma qalab ayaa ka maqan miiska-dhaqista, ma  
waxbaan shaqaynayn ama nadiif ma aha guriga  
dhar dhaqista? Sida ugu dhaqsiyaha badan ee  
suurtagalka ah usameey soo wargelin.  
Soo wargelintaada qaladka ku sheeg lumbarka  
ku dul yaal makiinada.  
Fadlan warqad ku dheji ku saabsan inaad  
wargelisay qalad si qofka xiga ee wax  
dhaqanayo uu uarko in la wargeliyay qalad.  
Sida caadiga dhowr maalmood ayay qaadataa  
samaynta.

#### TALO KAHOR SOO WARGELINTA QALAD

##### Ma furmayo godka makiinada dhar dhaqista?

- Ma dhamaatay dhaqistii? Godku waxa uu furmayaa keliya hadii barnaamijku dhamaado.
- Tijaabi inaad korontada ka damiso damiyaha wayn ee korontada. Sug 15 daqiiqo oo tijaabi inaad furto godka.

##### Ma daarmayo makiinadu?

- Ma xiran yahay godku?  
Ma riixday bilaabista (start)?  
Ma shidmeen korontada iyo biyaha?